

SHARCI L. 70 ee 19 Oktoobar 1975.

Beddelaad Xeerka Habka Mdaniiga qodobkiisa 250.

GUDDOONSHAH

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO TIXGELINAAHA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo ka Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

*Saxiixa Rafcaanka Maxkamadda Sare*

Xubinta 1aad ee qodobka 250 ee Xeerka Habka Madaniga, waa la beddelay, waxaana loo akhriyi doonaa sida soo socota:

« Rafcaanka loo qaadanaayo Maxkamadda Sare waaxaa saxiixa kara rafcaanlaha oo haddii uu doono isaga iska daafici kara Maxkamadda Hor-teeda ama qareenka u doodaayo waana in ay ka muuqataa rafcaankiisa».

Qodobka 2aad

*Burin*

Sharci kasto oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan waa la buriyay.

Qodobka 3aad

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa dhaqsi waxaana lagu qori doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 19 Oktoobar 1975.

GUDDOONSHAH

GOLAHA SARE EE KACAANKA

*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*